Socialstyrelsen

Somaliska

# Guurka carruurta – arrintaan waxey khuseeysaa Iswiidhan

**Iswiidhan waa carruur wixii ka yar 18 sano. Qofna ma guursan carruur Iswiidhan Carruurtu waxey xaq u leeyihiin in ay dhigtaan dugsi waxna bartaan,fursad u helaan hiwaayad oo ay u hormaraan qof ahaan. In reer la dhisto waa mas'uuliyad oo ay carruurta qaadi karin.**

### Gudaha Iswiidhan waxaad xaq u leedahay

- inaad go'aansato jirkaada, qofna galmo kulama sameyn karo haddii aadan ranbin.
- inaad isticmaasho walxaha uurka looga hortago haddii aadan rabin inaad uur yeelato.
- inaad sameyso ilmo soo tuurid haddaad rabto inaad joojiso uur.

### Carruurta oo dhan waxey leeyihiin isku xaquuq

Iswiidhan waxaad leedahay xuquuq la mid ah xitaa haddii aad jeclaato qof kugu jinsi ah.

Xuquuqda waxey quseysaa xitaa haddii aad tahay gabar lakiin aad dareemeyso sida wiil ama caksigeeda.

Waxaad kaloo leedahay xuquuq la mid ah haddii aad heysato karaan yari ama jiro.

### Caawinaad iyo taageero

Markasta waxaad ka heli kartaa adeega bulshada ee degmada caawinaad iyo taageero.

# Guurka carruurta – qawaaniinta iyo sharciga Iswiidhan.

Sida uu qabo sharciga Iswiidhan qofna ma guursan karo qof ka yar 18 sano.

### Qofna kuma qasbi karo carruur in uu guursado

Waa sharci daro in lagu qasbo ama lagu siro carruur in uu u safro waddan kale si uu usoo guursado. Waa danbi xabsi lagu muteysan karo.

Waa sharci darro in lagu qasbo carruur in uu ku noolaado xiriir wada noolaasho oo u eg guur.

### Guur carruureedka waddanka dibaddiisa lagu soo dhisay kama sharciyeysna Iswiidhan

Laga billaabo 1 bisha janawari 2019 guur kama jiri karo Iswiidhan haddii mid ka mid ah labada lamaane ey da'diisu ka yartahay 18 sano marka ey is guursadeen.

Mararka qaar waa la aqoonsan karaa guur carruureed waddanka dibaddiisa lagu soo dhisay. Kow waa in labada lamaane ey da'doodu ka weyntahay 18 sano marka ey dalbanayaan in guurkooda looga diiwaan geliyo Iswiidhan. Lamaanaha waa in ey is guursadeen ka hor 1 bisha janawari ee 2019 ama waa in ey jiraan "sababo la aqbali karo" si loo aqoonsado guur carruureedka.

Sababo la aqbali karo waxaa tusaale ahaan ka mid ah in ey jiraan cawaaqibo halis u keenaya lamaanaha haddii eysan isasii qabin. Kiis kasta si gaar ah ayaa loogu kuur gelayaa.

Haddii aad rabto inaad wax badan ka ogaato waxaad la hadli kartaa xog-hayaagada arrimaha bulshada, howl- wadeenkaada ama la taliyaha dugsiga. Sidoo kale waxaad la xariiri kartaa tusaale ahaan BRIS ama Rädda Barnen.

# Haddii aad ka yartahay 15 sano

Carruurta ka yar 15 sano waxey leeyihiin xuquuq weyn oo ka ilaalineysa in aan lala sameynin galmo. Waa danbi in lala galmoodo qof ka yar 15 sano. Waa fal danbiyeed lagu magacaabo carruur xoogid.

Haddii aad ka yar tahay 15 sano oo aad sameysay galmo taas macnaheeda ma ahan inad qalad sameysay.

Waxaad heli kartaa caawinaad adigoo la hadlaya qof weyn oo aad ku kalsoon tahay kaana caawin kara inaad hesho taageero. Waxaad kaloo heli kartaa kaalmo ah inaad wargeliso booliska.

Sharciyadaan waxaa loogu tala galay iney ilaaliyaan carruurta iyo in ay helaan carruurta carruurnimo xasilloon.

### Caawinaad iyo taageero

Qaabilaada dhalinyarada ee degmada aad degen tahay waxaad ka heli kartaa warbixin ku saabsan caafimaadka iyo galmada. Bogga Youmo waxaa laga helaa warbixin ku saabsan galmada, caafimaadka iyo xiriirka oo luqada kala duwan ku qoron.

# haddii aad ka yartahay 18 sano carruurna aad heysato

Carruurtaadu waxey xaq u leeyihiin sidaadoo kale iney dareemaan caafimaad iyo xassilooni.

Waxaad mas'uul sharciyeed u tahay carruurtaada xitaa haddii aad ka yar tahay 18 sano. Mas'uulka sharciga wuuu mas'uul ka yahay xaqqa u leeyahay inuu go'aamiyo carruurta.

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan waalidnimada ama inaad hesho kaalmo ku saabsan inaad daryeesho ilmahaaga, waxaad la xariiri kartaa adeega bulshada ee degmadaada.

### Haddii aad adiga iyo waalidka kale isla degeynin

Carruurta waxey xaq u leeyihiin labadooda waalidba. Arrintan waxey khuseysaa xitaa haddii aad guur ku dhex nooshahay.

Haddii aydaanin isla degeynin waxey adeega bulshada idinka caawini karaan inaad go'aansataan meesha uu ilmuhu degi doono iyo sida labadiina ilmuhu ula xiriireysaan.

# Taageero iyo caawinaad

Haddii aad isweydiineyso arrin ama aad u baahan tahay caawinaad waxaa dad badan aad u tagi karto.

Tusaale ahaan waxaad la hadli kartaa:

- wakiilkaaga ama ama qofka sida khaaska ah looga dhigay inuu noqdo qofka leh mas'uuliyaddaada sharciyadeed
- xog'hayahaaga arrimaha bulshada.
- macalinkaada dugsiga
- kaalmeeyahaaga dugsiga ama kalkaalisada
- shaqaalaha istbitaalka qeyba qaabilaada dhalinyarada.

Waxaa jira sharciyo xadidaya waxa ay dadka waawweyn ee la shaqeeya carruurta kaa sheegi karaan adiga. Taas waxaa lagu magacaabaa sharciga sir-xajjinta iyo aamusnaanta.

Haddii qofka aad la hadleyso uu welwelo uu u maleeyo waxa aad sheegeyso in ay halis kuu noqon karto waxa ay u sheegi karaan arrintaas adeega bulshada. Taasli waxaa lagu magacaabaa iney sameynayaan wargelinta walwalka. Si aad u hesho caawinaad sax ah iyo in aan lagaaga tagin keligaa xaalad culus. Adeega bulshada wuxuu ka mas'uul yahay in ay carruurta helaan marka ay koroyaan xassiloono iyo nabadgelyo.

### Xaalada degdega – wac 112

Haddii aad ku jirto xaalad degdeg ah oo aad u baahantahay caawinaad degdeg ah waxaad ka waceysaa booliska taleefanka 112.

### Halkaan waxaad ka heli kartaa warbixin dheeri ah

#### *Ku cusub Iswiidhan – carruurta iyo dhalinyarada*

Ku cusuub Iswiidhan waxaa ku jira warbixin badan loogu tala galay adiga ah ilmo iyo dhalinyaro ku cusub Iswiidhan.

#### *Khadka carruurta iyo dhalinyarada*

Adiga xiriirka la leh adeega bulshada ama caafimaadka, ama degen degaan-arday, waxaad xaq u leedahay inaad la xiriirto IVO si aad u hesho warbixin ku saabsan xuquuqdaada. Waad wici karaa ama farriin qoraaleyn kartaa.

#### *Guur-qasab ah*

Hedersfortryck.se waxaa ku jira filimaan loogu tala gala carruurta iyo dhalinyarada oo kusaabsan guurka qasabka ah

### *Galmo, caafimaad iyo xiriir*
Bogga Youmo waxaa laga helaa warbixin ku saabsan galmada, caafimaadka iyo xiriirka oo loogu tala galay dhalinyarada. Halkaan waad ka akhrin kartaa, ka daawan kartaa filimaan iyo waxyaale kale.

### *Fal danbiyeed ku wajahan carruur*
Waxaan rabaa inaan ogaado waxaa ku jira warbixin loogu tala galay carruurta iyo dhalinyarada lagu xadgudbay.

### *Bris – Barnens rätt i samhället Tel. 116 111*
Bris waad wici kartaa, u diri kartaa meyl ama farriin qoraaleed haddaad u baahan tahay inaad la hadasho qof weyn. Bogga waxaa lagu tarjumay luqado badam.

### *Rädda Barnens stödlinje Tel. 0200-77 88 20*
Haddaad timid keli Iswiishan oo aad u baahan tahay caawinaad.
Maalmaha oo dhan:Iswiidhish,ingiriis,tigreenya.
Maalmaha qaar:Carabi, baashto, soomaali,tigreenya.

### *Kvinnofridslinjen Tel. 020-50 50 50*
Haddii lagu handaday ama laguu geystay dhib jirka ah, ama maskaxda ama ku xadgudub jinsi ah.

## Haddaad rabto inaad la kulanto qof aad la hadasho
### *Kaalmeeyaha dugsiga*
Dugsi kasta waxaa jooga kaalmeeye dugsi kaasoo caawinaya ilmaha dugsiga. Weydii macallin ama qof kale oo jooga dugsiga sida aad ula xiriirri karto kaalmeeyaha dugsiga.

### *Jirka, galmada, qalabka ka hortaga uurka*
Waxaad aadi kartaa qaabilaada dhalinyarada haddaad heysto su'aalo ku saabsan jirka, galmada ama qalabka ka hortaga uurka. Waxaad kaloo aadi kartaa halkaas haddaad dareemeyso culeyso oo aad u baahato inaad la hadasho qof.Hitta din närmaste ungdomsmottagning.

### *La kulan dadka kale oo ah HBTQ*
RFSL waa shabakad qaxootiga, dadka waraaqo la'aanta ah iyo dadka cusub ee ah HBTQ. newcomers@rfsl.se

**www.kollpasoc.se/barnaktenskap**